

Warbixin Muhiim ah ee loogu tallogalay Kireystayaasha

HUD-caawisay

ee Ka joojinta Ka saarida CDC

Nofeembar 2020



Buug-yaraahan waxaa hormariiyah Xafiiska Dadweynaha iyo Guriyeenta Hindida (PIH) ee Waaxda Guriyeenta iyo Hormarinta Magaalada Mareykanka (HUD) si ay kaaga caawiso fahamka waxa Amarka CDC ula micna yahay kireystayaasha HUD-caawisay kuwaas oo ah kireystayaasha ee barnaamijyada PIH ee xiggo: Barnaamijka Foojarka Codka Guriyeenta (HCV), barnaamijka Guriyeenta Dadweynaha, oo dooro Qeybta 8 barnaamijka Dhaqancelinta Dhexaadka ah (Dhaqancelinta Dhexaadka). Haddii aad tahay kireystaha barnaamijka PIH, fadlan la xiriir milkiilahaaga ama wakaalada guriyeenta dadweynaha (PHA) wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan buug-yaraahan ama Amarka CDC. Waxaad sidoo kale booqan kartaa Websadyka CDC ee: <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/covid-eviction-declaration.html>.

Waa maxay ka joojinta ka bixinta CDC?

- Xarumaha Xakameynta iyo Kahortaga Cudurada (CDC) waxay ansixisay Amarka loo yaqaan Hakinta Ku meelgaarka ah ee Ka guurinta Deegaanka si looga Hortago Faafitaanka Dheeriga ah ee COVID-19. kireystayaasha buuxiyo sharuudaha u qalmida, Amarkaan **wuxuu si ku meel gaar ah ujoojinayaa ka saarida, bixinta kirada laga bilaabo Septeembar 4, 2020 illaa Diseembar 31, 2020.**

Tallaabooyinkee ayaa ah inaan qaado si aan uga illaalsamo ka guurinta oo lacag bixin kirada?

- Tallaabada 1:** Haddii aad ku jirtid heerka lacag bixin la'aanta milkiilahaaga ama PHA oo aad halis ugu jirtid in lagaa guuriyo inta u dhaxeyso Septeembar 4, 2020 illaa Diseembar 31, 2020, kadib **waa inaad** buuxisaa dhammaan todobada shahaadooyin ee Ku dhawaqaqida CDC oo halkaan laga heli karo:
 - Nooca Ingiriiska:** <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/downloads/declaration-form.pdf>
 - Noocyada la turjumay:** https://www.hud.gov/program_offices/public_indian_housing/covid_19_resources/resident_declaration_form-other_languages
- Tallaabada 2:** Haddii aad buuxisid dhammaan todobada shahaadooyin ee Ku dhawaqaqida CDC, kadib waa inaad saxiixdaa oo taariiqeysoo Ku dhawaqaqida.
- Tallaabada 3:** Bixi koobi saxiixan/taariiqeysoo ee Ku dhawaqaqida PHA-gaaga ama milkiilaha.

Tallaabada 1: Waa inaad marka koowaad buuxisaa dhammaan todobada shahaadooyin ee ku jiro ku dhawaqaqida CDC. Iyaga waa:

- Kuuma suurtogaleysa inaad bixisid kiradaada buuxdo sabab la xiriirto hoos u dhaca daqliga qoyska ama qarashaadka caafimaadka aan caadiga aheyn;**
 - Tallada!** Wixii ka qeybqaatayaasha guriyeenta dadweynaha iyo ka qeybqaatayaasha foojarka, kiradaada **marwalba** waxaa lagu saxayaa inay muujiso hoos u dhaca daqliga haddii aad usoo sheegtid isbadelka daqliga PHA-gaaga. Fadlan tixgeli inaad la xiriirto PHA-gaaga sida ugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah si aad dib ugu eegtid daqligaaga hadeer oo aad saxdid kiradaada si aad u muujisid isbadelka.
- Waxaad sameynseysaa dadaalkaaga ugu wanaagsan oo lagu sameynayo lacag bixinada qeybta waqtiveysan oo ah sida u dhow lacag bixinta buuxdo sida xaaladaha ogolaadaan.**
- Waxaad sameysay dadaaladaada ugu wanaagsan oo lagu helayo dhammaan caawinta dowlada la heli karo.**
 - Tallada!** Waxaad tixgelin kartaa ka qeybqaadashadaada hadeer ee barnaamijka caawinta kirada oo lagu go'aansanayo haddii aad sameysid dadaalkaaga ugu wanaagsan ee lagu helayo caawinta dowlada . Ka qeybqaatayaasha guriyeenta dadweynaha iyo ka geybqaatayaasha foojarka waxay sidoo kale tixgelin karaan haddii ay codsadaan PHA inay dib u eegaan daqligooda hadeer oo ku sax kirada si ay u muujiso isbadelka daqliga.
- Waxaad buuxisay mid ka mid ah xaaladaha xiggo: (1) waxaad filaneysaa inaad sameysid wax ka yar \$99,000 ee 2020 (ama \$198,000 haddii aad si wadajir ah u xareyneysid), ama (2) lagaama rabin inaad u soo sheegtid wax daqli ah ee IRS, ama (3) waxaad heshay jeega taageerada CARES Act.**
 - Tallada!** \$1,200+ lacag bixinta taageerada LAGUMA darin xisaabinta daqligaaga. Haddii aadan helin lacag bixinta taageerada, fadlan booqo bogga webkaan si aad u hubisid heerka lacag bixintaada oo buuxi foomka fudud: <https://www.irs.gov/coronavirus/get-my-payment>
- Haddii lagaa saarayo, waxaad u dhowdahay inaad guri la'aan noqotid, ama aad u guurtid hoyga guri laabaha, ama u guurtid guriyeyn cusub oo ay wadaagaan dad kale oo ku noolaanayo meel kuu dhow.**
- Waad fahamsantahay inaad masuul ka tahay bixinta kirada aan la bixin, waxaa laguugu dalici karaa qidmooyin oo kirada aan la bixin, oo waa inaad sii wadaa inaad u hogaansanaatid xeerkarka kireysigaaga.**
- Waad fahamsantahay in markii Amarka CDC dhaco Diseembar 31, 2020, waxaa ku quseyn karo ka saarida haddii aad leedahay kirada aan la bixin ama qidmooyinka aan la bixin.**

Tallaabada 2: Haddii aad buuxisd dhammaan todobadaada shahaadooyin ee Tallaabada 1, saxiix oo taariiqey Ku dhawaaqida.

- Qof walbooye weyn ee ku qoran kireysiga, heshiiska kirada, ama qandaraaska guriyeynta ee buuxiya sharuudaha lagu tilmaamay Tallaabada 1 waa inay saxixaan Ku dhawaaqida. Xaaladaha qaarkood, sida shaqsiyaadka buuxinayo soo noqodka canshuurta wadajirka ah, waxay ku haboonaan kartaa in hal xubin oo qoyska ah bixiyaan ku dhawaaqida lagu fulliyay matalaada dagayaasha dadka kale ee weyn ee kireysiga, heshiiska kirada, ama qandaraaska guriyeynta ee arinta ah. Waxaad isticmaali kartaa Ku dhawaaqida CDC, laga heli karo halkaan: <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/downloads/declaration-form.pdf>.

Tallaabada 3: Bixi koobi saxiixan oo Ku dhawaaqida ee milkiilahaaga ama PHA.

- **Muhiim ah!** Haddii aadan saxiixin oo aadan u gudbin Ku dhawaaqida ama PHA, kadib waxaa weli kadib lagaaga saari karaa lacag bixin la'aanta kirada inta u dhaxeysyo Septeembar 4, 2020 illaa Diseembar 31, 2020. Si kastaba, Ku dhawaaqida waxay kaaga baahantahay si aad u cadeysid warbixin dhab ah sida waafaqsan cizaabta been abuurka. Tani waxaa laga wadaa in bayaano walbooyeen been ah ama maran habaabin ama ka reebida waxay sababi kartaa dambiienimo iyo tallaabooyinka rayidka ee ganaaxyada, cizaabaha, waxyeelada, ama xabsiyeynta, marka **fadlan hubi inaad buuxisid DHAMMAAN shahaadooyinka ee Tallaabada 1 ka hor saxiixa Ku dhawaaqida**.
- Haddii ka guurinta lacag bixin la'aanta kirada bilaabato ka hor Septeembar 4th laakin weli lama dhameystirin, weli waad saxiixi kartaa oo aad gudbin kartaa Ku dhawaaqida milkiilahaaga ama PHA si lagaaga illaaliyo ka guurinta.
- Haddii ay suurtogal tahay, ku soo dir Ku dhawaaqida dhinaca i-meelka ama qaab kale ee ku siyyaa rasiid si markas ay u jirto diiwaanka ah inaad soo dirtay. Tusaale ahaan, qaab kale waxay noqon kartaa boosta lagu ansixiyay dhinaca Adeega Boostada Mareykanka oo ay la jirto rasiidka soo celinta la codsaday. Sidoo kale hayso koobiga Ku dhawaaqidaada (ku dhawaaqyadaada) saxiixan oo diiwaanadaada ah, oo ay ku jiraan taariiqda iyo saacada la soo diray ama la gaarsiiyay milkiilahaaga ama PHA.
- Ka qeybqaatayaasha foojarka waxay sidoo kale rabi karaan inay siyyaan Ku dhawaaqida PHA sidoo kale sida milkiilahaaga guriga.

Fadlan niyada ku hay:

- Haddii ay kuu suurtogaleysyo inaad bixisid kiradaada ama aad sameysid lacag bixinada kirada qeyb ah, waxaad weli u baahantahay inaad sidaas sameysid.
- Ka joojinta ka guurinada ee Amarka CDC way ka duwantahay hadda kadib joojinta dhacday ee ka guurinada ee CARES Act¹. Ka joojinta ka guurinada ee CARES Act waxay dhaceysaa Luuliyo 24, 2020. Kala duwanaanshaha ugu weyn ee u dhaxeeyo labada waa midaas, sida waafaqsan Dalabka CDC: (1) kireystayaasha waxaa looga baahanyahay inay saxixaan Ku dhawaaqida oo ay la jirto dhammaan todobada shahaadooyin si ay uga illaalo ka guurinta oo lacag bixin la'aanta kirada iyo (2) kireystayaasha waxaa lagu dalaci karaa qidmooyinka daahitaanka, cizaabaha iyo qidmooyin kale sabab la xiriirto kirada aan la bixin.
- Illaalinada kale waa laguu heli karaa haddii Gobolkaaga, deegaanka, ama maamulka deegaanka ku soo rogo ka joojinta dheer ama aadka u ugu adagtahay guurinada ee bixisa isku heerka ama heerka ka weyn ee illaalinta caafimaadka dad weynaha badelkii sharuudaha ku qoran Amarka CDC.
- Waxaad weli u baahantahay inaad raacdidd dhammaan sharuudaha kale ee kireysigaaga iyo sharciyada halka aad ku nooshahay. Kireystayaasha weli waa looga saari karaa falalka dambiihaha, falalka kale, ama ku xadgudubka kireysiga.

Tallaaooyinka ee La xiriirida Milkiilahaaga ama PHA:

Haddii aad la dhibaatooneysid inaad bixisid kirada ama aadan markale bixin karin, la xiriir milkiilahaaga islamarkaa si looga hadlo iqtiaaradaada. Inta lagu jiro waqtiyada murugada dhaqaalah, milkiilahaaga waxay la kulmi karaan caqabadaha sidoo kale. Isku day inaad si cad oo dagan aad ula xiriirtid iyaga. Halkaan waa tallooyinka qaar ee kaa caawinayo inay kugu hagto wada sheekeysiga milkiilahaaga:

- Ka ahow dacad ku saabsan xaaladaada. Haddii ay ku saameysay COVID-19 ama dhibaatooyinka kale, la wadaag sida daqligaaga u saameysay. Ka qeybqaatayaasha guriyeynta dadweynaha iyo ka qeybqaatayaasha foojarka waa inay la xiriiran PHA-gaaga sida ugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah si dib loogu eego daqligaaga hadeer oo loo saxo lacag bixintaada kirada.
- Tixgeli kormeera illo walba iyo dooqyada caawinta aad ogaatay.
- Sharax sida qoyskaaga ay u saameyneysa qasaaraha guriyeynta.
- Weydii wax ku saabsan diyaarinada lacag bixinta.
- Hayso i-meel walba iyo wada sheekeysiga fariin qoraalka oo sameyso qoraalada markii aad ku hadashid taleefon ama qof ahaan.

¹ Waxaa lagu dhaqan geliyay Qeypta 4024 ee Gargaarka fayraska Korona, Gargaarka, iyo Xeerka Amniga Dhaqaalah, 2020 "CARES Act" (Sharciga Dadweynaha 116-136).